

KAALMADA XAALADDA DEGDEG AH

Caawinta kirada/ijaarka iyo biilasha.



Waxaa laga yabaa inaad ka walacsan tahay wax ku saabsan dhibaatooyinka dakhligaaga iyo bixinta biilasha. Ismaamulka Ramsey ayaa halkaan u taagan inuu ugu caawiyo Kaalmada Xaaladda Degdeg ah (EA) iyo Kaalmada Guud ee Xaaladda Degdeg ah (EGA).

Kaalmada Degdeg waxay ka caawisa dadka waaweyn ee carruurta leh, iyo dumarka uurka ah. Kaalmada Degdeg waxay ka caawisa dadka waaweyn ee carruurta laheyn.

EA iyo EGA waxay ka caawiyaan kharashaadka hoyga, sida ijaarka / deyn bixinta, ama lacag dhigashada burburka ama dibositka loo yaqaan. EA iyo EGA sidoo kale waxay gacan ka geystaan bixinta adeegyada, marka lagu daro korantada, kuleylka iyo biyaha, marka ay jirto halis goyn ama lagaa goosto.

U QALMISTA KAALMADA

Waad u qalmi kartaa EA/EGA haddii aadan haynin wax kugu fillan oo lagu xalinayo dhibaatooyinkaaga oo waxaad muujin kartaa inaad leedahay daqli kugu fillan oo aad ku bixisid biilasha horay u socdo.

CODSO CAAWINTA XAALADDA DEGDEG AH | WAC 651-266-4884

Si aad u codsatid EA/EGA booqo ramseycounty.us/EmergencyAssistance.

Hadaadan Hada helin gargaarka bulshada oo aad dalbanayso barnaamijyo badan (SNAP, Caafimaad, lacag caddaan ah, kaalmada xanaanda caruurta) waxaad sidoo kale ku dalban karataa Khadka tooska ah ee loo adeegsado applymn.dhs.mn.gov.

Wixii su'aalo ah ee ku saabsan u qalmista ama heerka dalabka, ka wac khadka tooska ah ee EA / EGA taleefanka 651-266-4884. Shaqaalaha Caawimaada ayaa kusoo wicidoona si'ay kaaga jawaabaan wixii su'aalo aad kaqabtid caawinta barnaamijkaan, kuu soo diridoona warqadaha aad ku codsan lahayd ama taleefanka ayay kaaga caawinayaa.

AQBAARAHA U QALMIDA EA/EGA KA BILOW 13, 2020

- ✓ Barnaamijyada EA iyo EGA waxay joojiyeen sharciga ku saabsan inta jeer caawin oo malaha la heli karo (caadi ahaan kaliya hal jeer muddo 12 kii biloodba). Waad codsan kartaa EA/EGA xittaa haddii aad horaan ugu heshay caawin gudaha 12 kii bilood ee la soo dhaafay.
- ✓ EA/EGA waxay kaa caawinaayaan Ijaarka, ama hadii aad gurigaaga leedahay oo bixinaysid moorgaj ka, ama haddii aad u guuraysid gurikale iyo korantada, biyaha iyo gaaska. Kuwa raadinayo caawinta qarashaadka korontada waa inay marka koowaad ka codsadaan caawinta tamarta dhinaca Iskaashiga Tallaabada Bulshada ee Ramsey iyo Dagmooyinka Washington. Booqo caprw.org.
- ✓ Labada barnaamij ee degdega ahi waxay leeyihiin xaddidaad ugu badan ee lacagta dollar ah ee la bixin karo; tiradaas ayaa la kordhiyay. Fadlan kala hadal shaqaalahaaga dhaqaalaha waxa aad ugu baahan tahay; haddii wali ay ka badantahay EA ama EGA oo gacan ka geysan kara, waxaan kuu gudbin karnaa wakaaladaha kale ee bulshada ee kaa caawin kara maalgalinta dheeriga ah.
- ✓ Qaar ka mid ah sharuudaha u qalmida qaar sidoo kale waa la joojiyay. Shaqaalahaaga wuu kugu sharixi karaa midaan si faahfaahsan.